# Ma Haysan karaa Xayawaan?

Can I Keep a Pet?

## Xeerarka "Mamnuuca Xayawaanka"

Qaar badan oo ka mid qolyaha guryahu waxa ay leeyihiin xeerar "**mamnuuca Xayawaan"** oo la ilaaliyo. Laakiin xataa goobahaa, waxaa dhici karta inaad leedahay xaq ah inaad haysan karto xayawaan. Noocyada kala duwan ee guryaha ahi waxa ay leeyihiin xeerar kala duwan.



- Hadii aad ku nooshahay guri dowladeed, waxaad xaq u leedahay inaad haysan karto xayawaan.
- Hadii aad ku nooshahay guri kiradiisa lagaa kabo aadna ka soo baxdo shuruudaha waayeelnimada ama naafada, xaq waxa aad u leedahay inaad xayawaan yar haysan karto.
- Hadi aad leedahay **xayawaanka adeega**, waxa aad xaq u leedahay inaad haysan karto. Xayawaanka adeegu waa xayawaan si gaar ah loogu tababaray caawinta naafada.
- Hadii xayawaankaagu uusan ahayn xayawaanka adeega, laakiin, aad naafo tahay aadna ugu baahan tahay inuu ku caawiyo sababta oo ah naafanimadaada kolkaa waxaad xaq u yeelan kartaa inaad haysato.  Jawaabtu waxa ay ku xiran tahay xaqaa'iqa xaaladaada. Waxaa dhici karta in lagu waydiisto inaad cadeyso naafanimada iyo sida ay ula xiriirto baahidaada ah helida xayawaan wehel ah.
- Magaalooyinka intooda badani waxa ay leeyihiin sharciyo ku saabsan nooca iyo inta xayawaan ee aad haysan karto.



## Guryaha Dowlada iyo Kuwa Kiradooda la Kabo

Waxaa jira sharciyo gaar ah oo quseeya dadka ku nool guryaha dowlada. Hadii aad ku nooshahay guri dowladeed ama aad tahay qof waayeel ah ama naafa ah oo ku nool guraha kiradooda la kabo, kolkaa waa aad haysan kartaa xayawaan.  Qolada gurigu waxa ay dejin kartaa xeerar macquul ah oo ku saabsan xayawaanada – oo ay ku jiraan meelaha aad u kaxaysan kartid xayawaankaaga iyo sida aad u nadiifinayso saxaradooda.

**Ka hor inta aadan keensan xayawaan yar,** ka hel nuqul xeerarka xayawaanada yaryar qolada guryaha dowlada ama qolada guriga aad ka kireysatay hubina in aad u hogaansami karto.

## Xayawaanada Adeega

Hadii aad indho ama dhago la' dahay, ama aad naafo curyaan ah tahay, ama aadan waxyaabaha qaarkood dareemin, sharciyada Minnesota waxa ay ku siinayaan adiga xaq aad ku haysan karto xayawaan adeeg. Xayawaanka adeegu waa xayawaan si gaar ah loogu tababaray inuu kaa caawiyo naafanimada. Qolada gurigu kuguma soo dalici karaan wax khidmad oo xayawaanka la xiriirta. Laakiin waa inaad bixisaa wixii khasaaro ah uu xayawaanku u geysto guriga. Qolada gurigu kuulama dhaqmi karto si ka duwan sida ay ula dhaqanto dadka kale ee guriga degan. Tusaale ahaan, kuguma khasbi karaan inaad ku noolaato sarta dabadeeda dambe sababtoo ah waxa aad haystaa eyg "indho kuu ah."

Haddii qolada gurigu aysan ogayn in xayawaanka aad haystaa uu yahay xayawaan adeeg, ama aysan iska cadayn in uu xayawaanku yahay mid adeeg, waxa ay ku waydiisan karaan inaad keento qoraalo cadeynaya inaad u baahan tahay inaad haysato xayawaan adeeg.

## Xayawaanka ay Dugsadaan Dadka Naafada ahi

Hadii ay naafanimo jirto, waxa aad xaq u leedahay inaad xayawaan haysan karto. Tani waa arrin run ah oo ka jirta guryaha oo dhan. Xayawaankaaga khasab ma aha inuu yahay "xayawaan adeeg oo si gaar ah u tababaran". **Naafada** waxaa laga wadaa inaad leedahay cudur maskaxiyan ah ama mid jireed oo si weyn u xadida hawl nolosheed oo aad u weyn – sida shaqada, socodka, cunto cunida ama hadlida.

## Maciinada Macquulka ah iyo Xayawaanada Caawinta

Hadii aad naafo tahay, waxa aad waydiisan kartaa qolada guriga inay wax ka bedelaan qaar ka mdi ah xeerarka, oo ay ku jiraan xeerarka "mamnuuca xayawaanka." Isbedeladaa waxaa la yiraa "maciinada macquulka ah." Sharciyada dowlada dhexe iyo kuwa xaquuqda muwaadinka ayaa faraya qolada guriga iyo cid walba oo kale sida iskaashatooyinka guryaha wada gata, inay u fidiyaan maciino macquul ah dadka naafada ah.

Waxa aad u baahan tahay inaad tusto 3 wax si aad u hesho maciin ah inaad haysan karto xayawaan:

- Inaad naafo tahay
- Inaad u baahan tahay xayawaan inuu guriga joogo **sababtoo ah** naafanimadaada
- In ogolaanshaha xayawaanku uu yahay suurtagal



Waxa aad u baahan kartaa inaad ka keento warqad faahfaahsan dhaqtarkaaga ama cid kale oo xirfadlayaal ah. Warqadu waa inay cadeysaa inaad naafo tahay aadna u baahan tahay xayawaanka si kolkaa aad u hesho inaad si dad kale la mid ah aad u isticmaasho una nafisto guriga.

Helida maciin macquul ahi waxa uu ku xiran yahay xaqaa'iqa xaalada. Waa khasab inaad daryeeli karto xayawaanka aadna hubiso inuusan dadka kale dhibin. Waxaad u baahan kartaa inaad ka keento warqad qolo guri aad horey uga jiri jirtay taa oo oranaysa in aan xayawaankaagu wax dhib ah cidna u geysan.

Qaadid khidmad ama kiro siyaado ah oo xayawaanada adeega ama kuwa wehelka awgood loo qaado sharcigu MA ogola.

## Ilaalinta Xaquuqdaada Muwaadinka

Ka bilow inaad la hadasho qolada guriga, adigoo u sharxaya sharciga eegayana inaad heshiisaan. Nuqul ka tus warqadan xaqiiqda. Hadii aydnaan heshiin, waxa aad xareysan kartaa ashtako. Waxaa dhici karta inaad heli karto amar maxkamadeed oo kuu ogolaada inaad haysan karto xayawaan. Waxaad kaloo heli kartaa lacag maqdhow ah hadii aysan kuu ogolaan qoladu inaad haysan karto xayawaan, laakiin waa inay kuu ogolaadaan.

Hadii aad tahay dan yar aadna, ka wac xafiiska gargaarka sharciyada (legal aid) ee deegaankaaga 1-(877) 696-6529. Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta: www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.

Waxaad kaloo ka xareysan kartaa ashtako hay'ad dowli ah. Kiiska iyaga ayaa baari iyadoon wax lacag ahi adiga kaaga bixin. Waxaa dhici karta inay kaa caawiyaan inaad heshiis gaartaan ama waxaa dhici karta inay kiis dacwo ah ku furaan qolada guriga. La xiriir:

**MN Department of Human Rights**
Griggs Midway Building
540 Fairview Ave North, Suite 201
St. Paul, Minnesota 55104

Telefan: (651) 539-1100 ama 1(800) 657-3704
TTY: (651) 296-1283

**MN Department of Human Rights – St Cloud**
City Hall
400 Second St South
St. Cloud, MN 56301

Telefan: (320) 650-3133



**Labada xafiisba:**
Khadka ka gargaarka takoorka (helpline): 1-(833) 454-0148
Iimaylka ah: info.mdhr@state.mn.us shabakada (website) ah: www.mn.gov/mdhr/

**Housing and Urban Development (HUD)**
Minneapolis Field Office
212 Third Ave South, Suite 150
Minneapolis MN 55401

Telefan: (612) 370-3000

**Housing and Urban Development (HUD)**
77 West Jackson Boulevard
Chicago, IL 60604-3507

Telefan: (800) 765-9372

**Labada xafiisba:** www.hud.gov

**Degdeg ugu dhaqaaq hadii aad xareysanayso ashtako!** Mar kasta oo aad degdeg u wacdaa, waa mar kastoo ay u badan tahay in wanaag ka soo baxo dacwada. Waxaa jira waqtigo kama dambays ah oo la xareysan kiisaska! 1 sanno ashtakooyinka laga xareysanayo hay'ada kasta oo dowli ah ama dacwo la cuskanayo sharci gobol, iyo 2 sanno dacwooyinka sharci dowlada dhexe leedahay la cuskanayo.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**